

Sida Daawooyinka Tallaalka COVID-19 Loo Sameeyay

12/16/2020

Daawooyinka tallaalka koobaad ee COVID-19 ayaa waxaa la soo saaray sanad gudihiis kadib markii la helay fayraska COVID-19. Waxaa jira su'aalo badan oo la xariira sida dhaqsiga ah ee loo saaray daawada tallaalka. Iyadoo ay gacan ka geysatay dawlada federaalku, shaqada ayaa awoodday inay si degdeg ah oo hufan ku qabsoonto. Waa muhiim in la ogaado in talaabooyinka lagu hubinaayo badqabka aan laga boodin. Jadwalladaan ayaa muujinaaya hanaanka loo maray samaynta daawooyinka tallaalka COVID-19 loogu sameeyay si ka waxtar badan marka loo barbardhigo sida tallaallada kale loo sameeyay.

Sida daawooyinka tallaalka loo sameeyo


Hanaanka loo maro samaynta daawo tallaalka ayaa qaadata ilaa 10 sano.

- Kadib marka cilmi baarista la dhameeyo, daawo tallaalka ayaa la marsiiyaa saddex tijaabo caafimaad oo dadka lagu samaynaayo; mid kasta waxay leedahay dad aad ugu badan kuwii tii hore.
- Maamulka Cuntada iyo Daawada (The Food and Drug Administration (FDA)) ayaa ansixisa daawada tallaalka kadib marka kooxda talo bixinta saynisku ay dib u eegis ku sameeyaan natiijooyinka cilmi baarista.
- Kadib kooxda talo bixinta qaranka, Gudigga Talo Bixinta Hawlaha Tallaalka (ACIP) ee Xarunta Xakameynta iyo Ka hortagga Cudurrada (Centers for Disease Control and Prevention) (CDC), ayaa ku taliya dadka la siinaayo tallaalka.
- Intaas kadib, shirkadda ayaa bilaabaysa inay daawada tallaalka samayso.
- Markay dadku helaan talaalka, CDC iyo FDA ayaa sii wadaaya inay eegaan xogta badqabka ee talaalka.



Sida loo sameeyo tallaalka COVID-19

- Cilmi baaris hore oo lagu sameeyay korona fayras iyo hormarka dhanka tignooloojiyada hallaalka ayaa hanaankaan u sahlay inuu degdeg ku bilowdo.
- Mararka qaar helitaanka lacag lagu qarash gareeyo daraasaadka tallaalka ayaa qaadan karta muddo dheer, laakiin tallaalka COVID-19, dawladda federaalka ayaa lacag badan ku bixisay.
- Shirkadaha tallaalka sameeya ayaa shaqaalaysiiyay ka qaybgalayaal dhammaan saddexda waji ee daraasaadka caafimaadka waqti isku mid ah, halkii ay midba mar sugi lahaayeen.
- Shirkadaha talaalka ayaa sidoo kale samaynaaya tallaalka intay wadaan daraasaadka caafimaadka.
- Ansixinta daawado tallaalka ayaa u baahan Ogolaanshaha Isticmaalka Degdega ah (EUA) taas ayaa sidoo kale qaadata waqti kooban. Helitaanka daawo tallaalka oo badbaado leh oo shaqaynaysa ayaa ah muhiimada koobaad.
 - Kooxaha heer federaal ayaan ogolaanayn inay jiraan wax ka daahinaaya inay dib u eegaan ayna sida la filaayo ansixiyaan daawadooyinka tallaalka. Tusaale ahaan, FDA ayaa shaqaale badan qoratay si ay usoo koobto shaqada dib u eegista oo halkii ay ka ahaan la'hayd bilo ka dhigtay asbuucyo.
- Daawada tallaalku waxaa kaliya la ansaxinnayaa haddii daraasaadku muujiyaan in tallaalku uu badbaado leeyahay uuna shaqaynaayo.



Wali waxaa jiro waxyaabo aan u baahanahay inaan ka ogaano tallaalka COVID-19, sida mudada difaaca tallaalku soconaayo iyo sida wanaagsan ee uu ugu shaqayn karo dadwaynaha guud, laakiin kuwaani ma aha sababo dib loogu dhigo qaadashada tallaalka COVID-19 oo amaan iyo waxtar u leh lana siiyo dadka.

Wixii xog dheeraad ah, fiiri [COVID-19 Vaccine \(www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/vaccine.html\)](https://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/vaccine.html).



Minnesota Department of Health | health.mn.gov | 651-201-5000
625 Robert Street North PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975

La xariir health.communications@state.mn.us si aad u codsato xogta oo qaab kale ah. (Somali)